

IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 30ka Djsember 1986 Lr. 3 R 12

## JAMHUURİYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

بريدية شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** fanna-dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedaana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanka F. R. kaadhi sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qortitaanka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

### K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 31 ee 2 Dis. 1986, Oggolaansho Heshiisyo dhexmaray Hay'adda Horumarinta Caalamiga, J.D.S. iyo Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed

Bog; 856

QAYBTA

LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 36 ee 30 Okt. 1986, magacaabid Nootaayo

»

857

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 37 ee 30 Okt. 1986, Magacaabid Nootaayo

»

858

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 38 ee 1 Sebt. 1986, Kordhin Ujuuradaha bixinta Sumadaha Baabuurta, Rimoorkiyada iyo Dhugdhu'ayaasha

»

859

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 39 ee 28 Nof. 1986, Bilad <sup>o</sup> Maar ah ee Hawlkar- nimo lagu maamusay 79 isugu jira Hay' addo Gobolo, Degmooyin	»	860
XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 40 ee 2 Dis. 1986, Meeimarin Heshiisyo	»	869
DECREE: No. 40 on 2 Dis. 1986. Instru- ment of Ratification	»	870
QAYBTA SADDEXAAD		
TALOOYIN ISGAARSIIIN OG. IYO WIXII LA MID AH DAWLADDA HOOSE MUQ. 11.11.86, Naado Dhul Jale Cali Cumar Maxamed L. 867	»	871
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.11.86, Lumid Jeeg War. L. 151643 X/S ku qoran Maxamuud Maxamed Caliif L. 668	»	873
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.11.86, Lumid Jeeg War. L. 26016 ku qoran Yuusuf Maxamed Cilmi L. 669	»	874
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.12.86, Lumid Jeeg War. L. 18958 ku qoran Xaaji Cumar Sheekh Cali L. 670	»	872
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.12.86, Lu- mid Jeeg War. L. 0029090 ku qoran Xasan Sheekh Nuur L. 671	»	875
MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 20.12.86, Lu- mid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdi Axmed Sheekh Muuse L. 672	»	877
MAXKAMADDA G. HARGEYSA, ——— Lu- mid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdi Xasan L. 673	»	878
MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 10.8.85, Lu- mid Jeeg War. Lr. 159019 ku qoran Yuusuf Xaaji Cawaale.	»	879

QAYBTA KOOWAAD  
SHARCI

Sharci Lambar 31 taariikh 2 Dec. 1986 oggolaansho Heshiisyo dhexmaray Hay'adda Horumarinta Caalamiga, J.D.S. iyo Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta labada heshiis oo dhexmaray hay'adda horumarinta caalamiga, J.D.S. iyo Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan SDR 19.000.000 oo loogu talo galay mashruuca Casriyeenta Dekadaha.

2. Heshiisyada kor ku tilmaaman oo kala leh lambarada WP/M-1708 A/ASS iyo WB.M 170, B.SST waxaa lagu kala saxiixday magaalada Washington DC marka ay taariikhdu ahayd 18 Abriil 1986.

3. Heshiisyada kor ku tilmaaman waxay ka mid yihiin Sharcigan iyagoo ifaaqna u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiisyada ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan, waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo heshiisyaduba.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo heshiisyada sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Dec. 1986,

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeer Madaxweynaha J.D.S. Lambar 36 taariikh 30 Oct. 1986 Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo Sharciga lambar 1 ee 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawsha Nootaayada.

MARKUU TIXGELIYEEY: In J/yaasha hoos ku qoran oo horay uga tirsanaan jiray W. Garsoorka iyo Arjima Diinta, kuna shaqayn jiray Nootaayenimo, ay doorteen in ay shaqada Dowladda istiqaal ka keenaan, siina wataan hawlaha nootaayenimada, iyagoo ka faa'ideysa naya xaqa kala doorashada ee ku tilmaaman qod. 3aad Sharciga lambar 7 ee 2dii Febraayo 1986.

MARKUU TIXGELIYEEY: Soojeedinta Wasiirka Wasaarada Garsoorka iyo Arjima Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka laad

Jaaljayaasha hoos ku qoran waxaa loo magacaabay NOTAAYO, waxayna hawlahooda ka fulinayaan magaalada mid walba magaciisa ku hor qoran:

1. Dr. Muuse Xuseen Saddiq Xamar.
2. Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe Xamar.
3. Dr. Muumin Axmed Abuukar Xamar.
4. Dr. Cabdi Muuse Mayow Xamar.
5. Dr. Maxamed Xaaji Saciid Xamar.
6. J/le Saciid Axmed Ismaaciil Hargeysa.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Oct. 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

30 XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 37 ee ~~21163~~, kuna saab.  
Oct. 1986 Magacaabid Nootaayo.

### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo Sharciga lambar 1 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawsha Nootaayada.

MARKUU ARKAY: Qod. 2aad sharciga lambar 7 ee 2dij Feb. 1986, oo awoodda u alinaya Madaxweynaha J.D.S. in uu toos iyo tartan la'aan u magacaabo Nootaayo qofkii mudan.

MARKUU TIXGELIYEY: In J/yaasha kala ah Cabdiraxmaan Cilmi Cigaal, Cusmaan Nuur Cali Qonof iyo Sh. Maxmed Maxam d ay muddo dheer ka soo shaqeeyen Garsoorka Dalka J.D.S. Aqoonna ay u leeyihiin shuruudaha Dalka, hawlaha Nootaayainmadana ay si habboon u gudan karaan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Sooda:

#### Qodobka 1aad

Jaallayaashu hoos ku qoran waxaa loo magacaabay NOTAAYO, waxayna hawlahaada ka fulinayaan xafiisya na ka furanayaan magaalada Muqdisho.

1. Dr. Cabdiraxmaan Cilmi Cigaal.
2. Dr. Cusmaan Nuur Cali Qonof iyo
3. Jaalle Sheekh Maxamed Maxamuud.

#### Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 OCT. 1986.

MADAXWERNHAHA J.D.S.

**XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 38**

ee 21.1.63, kuna saabsan Ujuuradaha bixinta Sumadaha.

**MADAXWERNAHA J.D.S.**

**ISAGOO ARKAY:** Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

**ISAGOO ARKAY:** Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lr. 14 ee 21.1.63, kuna saabsan Ujuuradaha bixin Sumadaha Baabuurta iyo wixii la mid ah;

**ISAGOO ARKAY:** Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lr. 36 ee 16.5.81, kuna saabsan wax ka beddelid ujuuradaha sumadaha Baabuurta, Rimoorkiyada iyo Dhugdhuglayaasha.

**ISAGOO AJOONSADAY:** Inay lagamamaarmaan tahay in la kordhiyo ujuuradaha bixinta sumadaha kor ku xusan si qiimahooda loo waafajiyo kharajka ku baxay habeynta isla sumadahaas.

**ISAGOO TIXGELIYEY:** Talada ay soo jeediyeen Wasiirrada Lacagta iyo Gaadiidka Dhulka & Cirka.

**ISAGOO DHEGEYSTAY:** Golaha Wasiirada.

**WUXUU XEERIYEY**

**Qodobka 1aad**

Waxa la beddelay qod. 1aad ee Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lr. 36 ee 16,5,81, ee ku saabsan ujuuradaha sumadaha uu bixiyo Xafiiska Diiwaangelinta Baabuurta Rayadka ah (PRA) ha noqdaan kuwa cusub ama kuw la beddelayo ama la cusbooneysiinayo, waxaana laga dhigay sida soo socota.

- a) Sumadaha Baabuurta sidda hore iyo midda dambe Sh.So. 2,500
- b) Sumadaha Rimoorkiyada, midkiiba Sh.So. 1,200
- t) Sumadaha Dhugdhuglayaasha, midkiiba Sh.So. 800

**Qodobka 2aad**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Sep. 1986.

**MADAXWERNAHA J.D.S.**

**XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 39 ee 28 Nof. 1986.**  
Billado Maar ah ee Hawlkarnimo Lagu Maamusay  
79 Isugu Jira Hay'ado, Gobolo, iyo 226 Jaale oo ka mid  
Ah Maaxdii, Shaqaalahii iyo Dadweynahii Kaalinta Ko-  
waad ka galay fulinta hawsha Wajigu Kowaad ee Hirge-  
linta O.X.A.C.

**MADAXWEYNAHA JDS**

**MARKUU ARKAY:** Qod. 82aad ee Dastuurka.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga 65aad ee 19ka Okt. 1970 ee  
Abaalmariinta.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Qoraallada iyo warbixinta  
Guddoomiyaha Guddiga Sare Qaranka ee Oloaha  
Xoojinta Afka Carabiga.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Hawlkarnimada lagu gaaray  
Guusha la taaban karo ee wax ku oolka ah, si hawl  
karnimo ku dheehan tahayna laga soo nooyey hirge-  
linta O.X.A.C. Wajigiisii kowaad.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Inay lagama maarmaan ta-  
hay in Dadka ku shaqeeyey hawlkarnimada, Wadda-  
nimada, Niyad-samida, Iyagoo si hagar la'aan u  
gutay waajibaadkii ka saarnaa la guddoonsiiyo Aqoon  
siga ay ka mudan yihiin Ummaddooda, lagana reebo  
raad wax ku ool ah.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Talada Guddiga Abaalmar-  
inta MJDS.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**QODOBKA KELIYA**

Xeerka Soo Socda:

Waxaa lagu maamusay Billado Maar ah ee Hawlkarni-  
mo 79 oo isugu jira Hay'ado, Gobollo, Degmooyin iyo  
226 Jaalle ee hoos ku qoran oo ka qeyb qaatay hirge-  
linta O.X.A.C. Wajigiisii Kowaad.

1. Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.
2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
3. Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
4. Wasaaradda W. Iyo Hanuuninta Dadweynaha.

5. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
6. Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga.
7. Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha.
8. Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.
9. Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.
10. Wasaaradda Dalxiiska.
11. Dawladda Hoose ee Muqdisho.
12. Xoghaynta Dhexe Ololaha Xoojinta Afka Carabiga.
13. Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha.
14. Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (ENG).
15. Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.
16. Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.
17. Wakaaladda Madbacada Qaranka.
18. Wakaaladda Horumarinta Biyaha.
19. Wakaaladda Dayactirka Gaadiidka (FIAT).
20. Wakaaladda Horumarinta Beeraha (ADG).
21. Hay'adda Qaxootiga Qaranka.
22. Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed.
23. Shirkadda Caymiska Qaranka.
24. Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta.
25. Keydka Dhexe ee Batroolka.
26. Warshadda Sigaarka iyo Tarrqa.
27. Bankiga Ganacsiga iyo Keydka.
28. Hoteel Jubba.
29. Hoteel Al-Curuuba.
30. Hoteel Taleex.
31. Gobolka Banaadir.
32. Gobolka Shabeellada Hoose.
33. Gobolka Shabeellada Dhexe.
34. Gobolka Waqooyi Galbeed.
35. Gobolka Bay.
36. Gobolka Mudug.
37. Gobolka Jubbada Dhexe.
38. Gobolka Sanaag.
39. Gobolka Galgaduud.
40. Gobolka Bari.

41. Degmada Shangaani.
42. Degmada Kaaraan.
43. Degmada Boondheere.
44. Degmada Xamar Weyna.
45. Degmada Shibis.
46. Degmada Hawl Wadaag.
47. Degmada Marka.
48. Degmada Qoryooley.
49. Degmada Baraawe.
50. Degmada Afgooye.
51. Degmada Sablaale.
52. Degmada Jawhar.
53. Degmada Balcad.
54. Degmada Cadaale.
55. Degmada Aadan Yabaal.
56. Degmada Hargeysa.
57. Degmada Berbera.
58. Degmada Gabiiley.
59. Degmada Baydhabo.
60. Degmada Buur Hakabo.
61. Degmada Diinsoor.
62. Degmada Qansax Dheere.
63. Degmada Gaalkacyo.
64. Degmada Hobyo.
65. Xarar Dheere.
66. Degmada Jariiban.
67. Degmada Bu'aale.
68. Degmada Jilib.
69. Degmada Saakow.
70. Degmada Ceeri Gaabo.
71. Degmada Badhan.
72. Degmada Dhuusa Mareeb.
73. Degmada Ceel Buur.
74. Degmada Ceel Dheer.
75. Degmada Cadaado.
76. Degmada Cabuud Waaq.
77. Degmada Boosaaso.
78. Degmada Isku Shuban.
79. Degmada Bandar Beyla.
80. Jaalle Maxamuud Axmed Dacar Gobolka Ban/dir.

81. J/le Cabdule Maxamed Axmed Gobolka Banaadir.
82. J/le Nuur Cali Axmed. Gobolka Shabeelaha Hivse.
83. J/le Cusmaan Cumar Xaaji (Nastro Gob. Sh. Hoose
84. J/le Cali Xasan Cabdulle Gobolka Sh/Dhexe.
85. J/le Cali Maxamed Aadan Gobolka Sha/Dhexe.
86. J/le Maxamed Axmed Faarax Gob. W/Galbeed.
87. J/le Shire Guure Cumar Gobolka W/Galbeed
88. J/le Cabdullaahi Macallin Nuur Gobolka Bay.
89. J/le Cumar Sheekh Isxaaq Gobolka Bay.
90. J/le Cabdullaahi Cartan Waged Gobolka Mudug.
91. J/le Cabdullaahi Yaasiin Gobolka Mudug.
92. J/le Faarax Xandule Gobolka J/Dhexe
93. J/le Muuse Cabdi Cilmi Gobolka J/Dhexe.
94. J/le Ibraahim Cilmi Warsame Gobolka Sanaag.
95. J/le Maxamed Axmed Odawaa Gobo. Sanaag
96. J/le Axmed Maxamed Maxamuud Gobo. Gal/duud.
97. J/le Subeer Cabdikariin Boorle Gobol. Gal/duud.
98. Jaalle Mahad Xasan Maxamed Gobolka Bari.
99. J/le Maxamed Ceynab Maxamuud Gobol. Bari.
100. J/le Cali Maxamed Geeddi Wasaarada Arr. Gudaha
101. J/le Luul Ibraahim Xasan Wasaarada Arr. Gudaha
102. J/le Yuusuf Xasan Subeyr Wasaarada Ar. Gudaha
103. J/le Cabdiraxiim Sh. Axmed W. Waxb. & Barbarinta
104. J/le Cabdi Sh. Muudey Abuukar W. Wax. & B/nta.
105. J/le Cali Aayat Abiikar W. Waxb. & Barbaarinta.
106. J/le Maxamuud Cumar Faarax Gar. & Arr. Diinta.
107. J/le Axmed Xasan Sh. Cabdulle W. Gars. & Arr. D.
108. J/le Sh. Cabdisalaam Xasan Saciid W.G. & Arr. D.
109. J/le Maxamed Saalax Axmed W. Sh. & Isboortiga.
110. J/le Daahir Yuusuf Maxamuud W. Sh. & Isboortiga.
111. J/le Cabdi Cabsiiye Xiirey W. Sh. iyo Isboortiga.
112. J/le Maxamed Sheekh Nuur W. G.C. & Dhulka.
113. J/le Cusmaan Mahabba Madoobe W. G.C. & Dhulka
114. J/le Cabdullaahi Cismaan Ibraahim W. G.C. & Dhu.
115. J/le Maxamed Cabdi Xasan W. Dalxiiska.
116. J/le Cismaan Axmed Cali Wasaaradda Dalxiiska
117. J/le Maxamed Xuseen Nuur Wasaarada Dalxiiska.
118. J/le Cabdi Yuusuf Maxamed W.G. Badda & Dek.
119. J/le Farxiya Axmed Cabdi W.G. Badda & Dek.

- 120 J/le Cabdi Cabdulle Maxamuud W.G. Badda & Dek.
- 121 J/le Abuukar Maxamed Geeddi W.D.H. Muqdisho.
- 122 J/le Ibraahim Axmed Afrax W.D.H. Muqdisho.
- 123 J/le Xaawo Faarax Sugulle W.D.H. Muqdisho.
- 124 J/le Cali Sheekh Abuukar Xoghaynta Dhexe OXAC.
- 125 J/le Xasan Maxamed Xogheynta Dhexe OXAC.
- 126 J/le Cabdi Aadan Xuseen Xoghaynta Dhexe OXAC.
- 127 J/le Xaliima Barkhadle Caddaawe Xog. Dhexe OXAC.
- 128 J/le Seynab Khalijf Cali Xogheynta Dhexe OXAC.
- 129 J/le Axmed Sheekh Ismaaciil Xogheynta Dhexe OXAC.
- 130 J/le Diiriye Warsame Abuukar Xoghaynta Dh. OXAC.
- 131 J/le Cali Ibraahim Iidje Xoghaynta Dhexe OXAC.
- 132 J/le Xaliima Jaamac Xuseen Xoghaynta Dh. OXAC.
- 133 J/le Cabdullaahi Sheekh Nuur Xog. Dhexe OXAC.
- 134 J/le Cabdulqaarid Axmed Samatar Xog. Dhexe OXAC.
- 135 J/le Musdhaf X. Axmed Daalfir Wak. Badbada Sha/ha
- 136 J/le Axmed Cabdullaahi Cumar Jire Wak. B. Shaqalaha
- 137 J/le Xaliima Caamir Cali Xasan Wak. B. Shaqaalaha
- 138 J/le Axmed X. Xaashi Jaamac Wak. Gan. Umm. (Enj)
- 139 J/le Maxamed Salaad Caraale Faarax Wak. G.U. (Enj)
- 140 J/le Maxa'd Waaberi Cali Muuse Wak. G. Umm. (Enj).
- 141 J/le Muuse Cabdulle Cabdi Wak. Dek. Soomaalijeed.
- 142 J/le Axmad Maxamed Xaayow Wak. Dek. Soomaaljed
- 143 J/le Maxamed Sheekh Cijise Wak. Dek. Soomaalijeed.
- 144 J/le Saciid Maxamed Maxamuud Cumar W.M. Qaranka
- 145 J/le C/raxmaan Sh. Nuur Hijowle Wak. Mad. Qaranka
- 146 J/le C/qaadir Qaasim Cali Jaasim Wak. Mad. Qaranka
- 147 J/le Axmed Nuur Maxamed Wak. H. Maraakiibta.
- 148 J/le Maxamed Baani Faqi Wak. H/laha Maraakiibta.
- 149 J/le Bashjir Isaaq Cumar Wak. H/laha Maraakiibta.
- 150 J/le Cabdi Nuur Sh. C/salaam Max'ed Wak. H. Biyaha
- 151 J/le Axmed Ashkir Cabdi Wak. Horumarinta Biyaha.
- 152 J/le Cabdi Xaaji Maxamed Wak. Horumarinta Biyaha
- 153 J/le Max'ed Faarax Canshuur W.Hor. Beeraha (ADC).
- 154 J/le Axmed Nuur Cali Geeddi Wak. Hor. Beeraha (ADC)
- 155 J/le Qaasim Cusmaan Cumar Wak. H. Beeraha (ADC)
- 156 J/le Maxamed Xasan Macalin W. G. Gadjiidka (FIAD)
- 157 J/le Ibraahim Cumar Maxamuud Wak. G. G. (FIAT)
- 158 J/le Aadan Muumin Cabdi Wak. G. Gaadiidka (FIAT)

- 159 J/le Xasan Sh' Aadan Ciye Hay'adda Qax. Qaranka.  
160 J/le Ardo Xaashj Dhoore Hay'adda Qax. Qaranka.  
161 J/le Raage Muuse Nuur Axmed Hay'adda Q. Qaranka.  
162 J/le Cabdullaahj Maxamuud Diirshe Shirkadda Day.  
Soomaaliyeed.  
163 J/le Axmed Ismaaciil Cabdi Shirkadda Day. Soom/d.  
164 J/le Xasan Cabdalla Xasan Shjr. Day. Soomaaliyeed.  
165 J/le Cabdirisaaq Cigaal Bijlaal Shjr. Cey. Qaranka.  
166 J/le Maxamuud Yuusuf Cali Shjr. Ceym. Qaranka.  
167 J/le Maxamed Guure Aadan Shjr. Ceymiska Qaranka.  
168 J/le Maryan Faarax Warsame Akadeemiyada Fanka  
Iyo Suugaanta.  
169 J/le Axmed Bijxi Warfaa Akadeemiyada Fanka iyo  
Suugaanta.  
170 J/le Nadiifa Ducaale Kaahiye Akadeemiyada Fanka  
Iyo Suugaanta.  
171 Ibraahim Maxamed Nuur Keydka Dhexe ee Batroolka.  
172 J/le Saajid Cali Baalle Keydka Dhexe ee Batroolka.  
173 J/le Cabdullaahj Xersi Rooble Keydka Dh. ee Batroolka  
174 J/le Xasan Jumcaale Cabdulle Warshadda Sigaarka  
Iyo Taraqa.  
175 J/le Idris Maxamed Cusmaan W. Sigaarka & Taraqa  
176 J/le Cali Xuseen Afrax War. Sigaarka & Taraqa.  
177 J/le Ibraahim Axmed Cilmi Bankiga Ganacsiga & Ke.  
178 J/le Maxamed Maxamuud Maxamed Bankiga Ganac-  
siga iyo Keydka.  
179 J/le Saadiyo Axmed Cali Bankiga Ganacsiga & K/dka  
180 J/le Maxamed Axmed Maxamuud Jumcaale Hoteel Jub.  
181 J/le Cali Yuusuf Maxamuud Hoteel Jubba.  
182 J/le Yuusuf Nuur Guuleed Buux Hoteel Jubba.  
183 J/le Maxamed Cabdulqaadir Macalin Hot. Al-Curuuba  
184 J/le Xuseen Diirye Jaamac Hoteel Al-Curuuba.  
185 J/le Axmed Xasan Cabdi Hoteel Al-Curuuba.  
186 J/le Xabijba Axmed Xaaji Cali Hoteel Taleex.  
187 J/le Maxamed Axmed Cadow Hoteel Taleex  
188 J/le Cabdulqaadir Cismaan Mursal Hoteel Taleex.  
189 J/le Xalima Xersi Barre Degmada Shangaani.  
190 J/le Mukhtaar Maxamed Axmed Degmada Shangaani.

- 191 J/le Shariif Maxamed Muunye Degmada Shangaani.
- 192 J/le Muuse Xuseen Cumar Degmada Kaaraan.
- 193 J/le Ciise Axmed Maxamuud Degmada Kaaraan.
- 194 J/le Xareedo Axmed Jaamac Degmada Kaaraan.
- 195 J/le Yuusuf Diiriye Maxamuud Degmada X/Weyne.
- 196 J/le Axmed Sheekh Maxamed Degmada X/Weyne.
- 197 J/le Carban Maxamuud Dhuxurow Degmada X/Weyne
- 198 J/le Cabdullaahi Cali Bootaan Degmada B/Dheere.
- 199 J/le Yuusuf Cali Shiddo Degmada Boon Dheere.
- 200 J/le Cabdulqaadir Saciid Cilmi Degmada B/Dheere.
- 201 J/le Xuseen Maxamed Dhicjow Degmada Shibis.
- 202 J/le Axmed Jumcaale Kulmiye Degmada Shibis.
- 203 J/le Suldaano Maxamed Cumar Degmada Shibis.
- 204 J/le Cabdij Maxamed Cabdiraxmaan Deg.H/wadaag;
- 205 J/le Xasan Sheekh Cabdi Cusmaan Deg.H/wadaag,
- 206 J/le Daahir Maxamed Cilmi Degmada Hawl Wadaag.
- 207 J/le Ibraahim Ciise Yabarow Raage Degmada Marka.
- 208 J/le C/Casiis Xaaji Aadan Maxamuud Degmada Mark
- 209 J/le Xasan Yuusuf Maxamuud Faarax Deg. Marka.
- 210 J/le Xasan Cilmi Maxamuud Maxamed Deg. Qorivoley
- 211 J/le Ibrahim X. Caliyow Ibroow Talasow Deg. Qor/ley.
- 212 J/le Maxamed Nuur Cumar Maxamed Deg. Qoriyoley.
- 213 J/le Hibo Cali Maxamed Degmada Baraawe.
- 214 J/le Maxamud C/raxmaan Cumar Cabdi Deg. Barawe
- 215 J/le Khaliif Shire Xuseen Ibraahim Deg. Baraawe.
- 216 J/le Cali Aadan Tasama Degmada Af-Goove.
- 217 J/le Cabdiraxmaan Yuusuf Diiriye Deg. Af Gooye.
- 218 J/le Jaamac Ismaaciil Muuse Degmada Af-Gooye.
- 219 J/le Maxamuud Cilmi Cali Degmada Sablaale.
- 220 J/le Cabdi Raage Cabdulle Degmada Sablaale.
- 221 J/le Yaasiin Faarax Xasan Cumar Degmada Sablaale
- 222 J/le Maxamed Axmed Xersi Degmada Jowhar.
- 223 J/le Xasan Xuseen Daahir Degmada Jowhar.
- 224 J/le Musdhaf Makaa'ijil Jire Degmada Jowhar.
- 225 J/le Musdhaf Daahri Af-Qarshe Degmada Balcad
- 226 J/le C/Qaadir Maxamed Maxamuud Deg. Balcad.
- 227 J/le Cabdi Nuur Faarax Cigaal Degmada Balcad.
- 228 J/le Maxamed Cali Wehlive Degmada Cadale
- 229 J/le Cumar Maxamed Wirish Degmada Cadale.

- 230 J/le Sheekh aCbdujjaahi Sh. Maxamed Deg. Cadale.  
231 J/le Maxamed Cabdi Cumar Degmada A/Yabaa].  
232 J/le Axmed Cabdullaahi Kaafin Degmada A/Yabaa].  
233 J/le Saciid Nuur Faarax Fayte Degmada A/Yabaa].  
234 J/le Maxamuud Maxamed Cumar Cilmi Deg. Hargeysa  
235 J/le Axmed Sh. Xasan Faarax Maxed Deg. Hargeysa.  
236 J/le Axmed Warsame Cali Geesood Deg. Hargeysa.  
237 J/le Xuseen Macallin Daahir X. Max'ed Deg. Berbera  
238 J/le C/Sajaam Axmed Cilmi Xuseen Deg. Berbera.  
239/le Caydiid Cabdulle Baylah Cabdi Degmada Berbera.  
240 J/le Guuleed Ayaanle Axmed Degmada Gabilay.  
241 J/le Ismaaciil Beynax Cali Degmada Gebiley  
242 J/le Maxamed Guuleed Riiraash Degmada Gebiley.  
243 J/le Ayaanle Yuusuf Cali Degmada Baydhabo.  
244 J/le Faaduma Caabi Dhoore Degmada Baydhabo.  
245 J/le Musedhaf Aadan C/raxmaan Deg. Baydhabo.  
246 J/le Sadiin Axmed Cabdi Sheekh Deg. Buurhakabo.  
247 J/le Sheekh Barre Aadan Degmada Buurhakabo.  
248 J/le Axmed Salaad Maxamuud Cali Deg. R/haka.  
249 J/le C/laahi Jimcaale Faarax Degmada Diinsoor.  
250 J/le Cali Maxamed Qaasim Degmada Diinsoor.  
251 J/le C/samad Diirive Mire Degmada Diinsoor.  
252 J/le Yuusuf Sheekh Cumar Degmada Q/dheere.  
253 J/le Sheekh Axmed Sh. Maxamed Deg. Q/dheere.  
254 J/le Cabdi Macallin Xasan Degmada Q/dheere.  
255 J/le Maxamed Miuse C/dulle Farax Deg. G/kacvo.  
256 J/le Nuur vate Geelle Sivaad Cilmi Deg. G/kacvo.  
257 J/le Axmed Ciise Rootaan Geeddi Deg. G/kacvo.  
258 J/le Barkhad Cali Saalax Axmed Degmada Hobyo.  
259 J/le Daahir Saciid Xaashi Yuusuf Degmada Hobyo.  
260 J/le Maxamed Cabdi Maxamuud Degmada Hobyo.  
261 J/le Xuseen Diirive Maxamed Degmada X/dheere.  
262 J/le Cabdi Faarax Jaamac Diini Degmada X/dheere  
263 J/le Sh. C/laahi Cabdi Ahtidoon Raace D X/dheere  
264 J/le C/raxmaan Maxamed Faarax Maxamuud Deg.

Jariiban.

- 265 J/le Axmed Cilmi Cismaan Samatar Deg. Jariiban.  
266 J/le Maxamed Faarax Cadde Jaamac Deg. Jariiban  
267 J/le Maxamed Ibraahim Xuseen (Iidoow) D. Bu'aale

- 268 J/le Sheekh Axmed Xuuke Aadan Deg. Bu'aale.  
269 J/le C/laahi Macallin Xasan (Jawaari Deg. Bu'aale  
270 J/le Maxamed Qani Dubbad Faarax Degmada Jilib  
271 J/le Cali Ibraahim Faarax Degmada Jilib  
272 J/le Shiikheey Maxamed Subeer Degmada Jilib.  
273 J/le Shiikh Xuseen Aadan Salaad Degmada Saakow  
274 J/le Maxamed Cabdi Maxamed Ibraahim D. Sakoow  
275 J/le Maxamed Maxamuud Afrax Deg. Saakoow.  
276 J/le Sh. Jaamac Cawad Ducaale Faahiye D. C/Gabo.  
277 J/le Maxamed Cilmi Hubbane Wardheere D. C/Gabo.  
278 J/le X. Yuusuf Maxamed C/kariim Deg. C/Gaabo.  
279 J/le Cali Maxamed Aadan Carraale Deg. Badhan.  
280 J/le Ismaaciil Maxamuud Cali Cawi Deg. Badhan.  
281 J/le Raxma Ciise Axmed Ibraahim Deg. Badhan.  
282 J/le Maxamuud Cartan Dirir Degmada Dh/Mareeb  
283 J/le C/qaadir Shiikh Maxamuud Deg. Dh/Mareeb.  
284 J/le Cali Maxamed Faarax (Saafi) Deg. Dh/Mareeb  
285 J/le C/laahi Cilmi Yuusuf Degmada Ceel-Buur.  
286 J/le Cali Aadan C/raxmaan Degmada Ceel-Buur.  
287 J/le Xaajiya Abshira Cumar Degmada Ceel-Buur.  
288 J/le Maxamed Faarax Cabdalle Deg. Ceel-Dheer.  
289 J/le Cali Abiikar Shadoor Degmada Ceel-Dheer.  
290 J/le Xasan Warsame Jaamac Degmada Ceel-Dheer  
291 J/le C/laahi Shiikh Siraj Degmada Cadaado.  
292 J/le Cabdul Aadan Bootaan Degmada Cadaado.  
293 J/le Cibaado Axmed Magan Degmada Cadaado.  
294 J/le C/raxmaan Maxamed C/laahi Deg. Cabuudwaq  
295 J/le Maxamed Shiikh Aadan Diiriye Deg. Cab/waaq  
296 J/le Axmed Jaamac Diiner Degmada Cabuudwaq.  
297 J/le Aadan Cali Bootaan Degmada Boosaaso.  
298 J/le Maxamed Cabdi Awaare Axmed Deg. Boosaaso.  
299 J/le Maxamed Cismaan Ibraahim Deg. Boosaaso.  
300 J/le Maxamed Xasan Yuusuf Degmada Iskushuban  
301 J/le Caasha Cawaale Maxamed Deg. Iskushuban.  
302 J/le Ardo Xuseen Ciise Degmada Iskushuban.  
303 J/le Aashiid Nuur Ibraahim Degmada Bandarby  
304 J/le Cali X. Faarax Maxamed Deg. Bandarby.  
305 J/Saciid Maxamed Yuusuf Deg. Bandarby.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha  
Jamhuuriyadda Dimqoraadiga S. Soo Saxiixo

Muqdisho, 28 Nov. 1986

Maxamed Siyaad Barre

Xeer lambar 40 taariikh 2 Dec. 1x86 Meelmarin He-  
Muqdisho, 28 Nov. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

shiiyo.—

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad Faqradda 5aad iyo qod.  
82aad, Faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disem.  
1984, kuna saabsan wax ak bedelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigusu yahay ee 2.12.86  
oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku  
Oggolaaday Heshisyada Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan ta  
hay in heshisyadan la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska Amaahda Horu-  
marinta ee dhexmaray J.D.S. Iyo Hay'adda Horumarinta  
Caalamiga ah oo lagu kala saxiixday magaalada Washin-  
ton DC taariikhdu markay ahayd 18ka Abriil 1986 iyo  
Heshiiska Mashruuca Casriyeenta Dekadaha ee dhex-  
maray Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah iyo Wakaa-  
ladda Dekadaha Soomaaliyeed, oo lagu kala saxiixday  
Magaalada Washinton DC taariikhdu markay ahayd  
18ka Abriil 1986.

Qodobka 2aad

Heshisyadani waxay Dalka J.D.S. Ku yeelanayaan  
astaaan Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu sa-  
xiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa  
Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Dec. 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree No 40 2 Dec. 1986 Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 Decembar 1984.

HAVING SEEN: The Law no of 2.12.1986 on the base of which the People s Assembly has approved the Agree mente Specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agree ments.

HEREBY PROMULGATES:

The Following Decree:

ARTICLE I

The Development credit Agreement between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed in Washington, DC, on April 18, 4, 86, and the project Agreement (Port modernisation Project) between international Development Association, and Somali Ports Authority, signed in Washington, DC, on April 14, 1986 are hereby ratified.

ARTICLE II

The Agreements shall has a force of law in the Rerritory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE III

The Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published on Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 2 Dec. 1986.

THE PRESIDENT OF S.D.I.

Mohamad Siad Barre

**QEYBTA            SADDEXAAD**  
**TALOOPYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH**  
**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO**  
**WAAXDA DHULKA RASMIGA AH**  
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in J.1e Cali Cumar Maxamed Car-  
maan uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah  
ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd  
6 Nof, 1986 uu ku weydiistay gabal dufur Dawladda ah oo ku  
yaal Muqdisho, Deg. Cabdicasiis Qaabkiisuna yahay Rett.  
Aadaminisuna yihun Mt. 29X9 = kuna fadhiga 261 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU TILMAAMAN**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhulkiisa hore  
Koorur waxaa ka xiga: Xaawo Muuro  
Gajbeed waxaa ka xiga: Xaawo Muuro  
Bari waxaa ka xiga: Waddada Sanca

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiiican uga arki ka-  
raa Naqshadka dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah  
ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30)  
(soddon maa]mood ah) laga billaabo maa]inta lagu soo qoro  
Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Nof, 1986

**AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR**  
**(J.1e Xuseen Axmed Aadan)**

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**  
**HADDUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J/le Maxamuud  
Maxamed Cariif.

**HADDUU TIXGELIYEY:** In uu Lumay J/War. Lr. 151643  
kuna jirto Lacag dhan Sh. So. 34,300 kuna qoran maga  
ca J/le Maxamuud Maxamed Cariif sida ku cad warqad  
da Lamb. 593 ee Tr. 2,11,86, ka soo baxday Bankiga Ga  
nacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Bankiga Dhexe  
**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dij.

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lambar  
151643 X/S laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka  
Soomaaliyeed Laanta Bankiga Dhexe kuna jirto lacag dhan  
Sh. So. 34,300 kuna qoran magaca J/le Maxamuud Maxamed  
Cariif.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta  
**HAY/ADDA SICOS** In ay siiso J/le Maxamuud Maxamed  
Cariif Lacagta Cadadkeedu tahay Sh So. 34.300 oo ah bedde  
lkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto mud-  
do aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalin<sup>ta</sup> Go'  
aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii  
inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.11.86,

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR,**

Dr. Cabdi Salaad Shongole,

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**HADDUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J/le Yuusuf Maxamed Cilmi

**HADDUU TIXGELIYEEY:** In uu Lumay B/Kayd Lr. 26016, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 27,357.35 kuna qoran magaca J/le Yuusuf Maxamed Cilmi sida ku cad warqadda da Lr. 001878 ee Tr. 24,11,86 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaljiyeed Laanta Xarunta.

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharcii Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

**WUXUU XEERIYEEY**

In la baabi'yo (Ammortamento) Buug Kaydka Lambar 26016 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaljiyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 27,357.35, kuna qoran magaca J/le Yuusuf Maxamed Cilmi.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaljiyeed Laanta Xarunta in ay siiso J/le Yuusuf Maxamed Cilmi lacagta cadaadkeedu tahay Sh.So. 27,357.35, oo ah beddelkii Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiya ah ee J.D.S. Haddii inta ka horay sa wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29,11,86.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR,**

**Dr. Cabdii Sa'laad Shongole,**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Cumar Sheekh Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 18958 kuna jirtolacag dhan Sh.So. 20,296,51 kuna qoran magaca J/le X. Cumar Sheekh Cali sida ku cad warqadda Lambr 001931 ee Tr. 2,12,86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijyeed Laanta Xarunta Muq.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharcii Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Jeeg Wareega Lambar 18958 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijyeed Laanta Xarunta Muq. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20,296,51. Kuna qoran magaca J/le X. Cumar Sheekh Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijyeed Laanta Xarunta Muq. In ay siiso J/le X. Cumar Sheekh Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20,296,51, oo ah beddejkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3,12,86.

GUDDOOMIYAHAN MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.

Dr. Cabdii Sajaad Shongole,

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**NADDUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J/le Xasan Sheekh Nuur

**HADDUU TIXGELIYEEY:** In uu Lumay J/War. Lambar 0028090 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45,000 kuna qoran magaca J/le Maxamed Cabdi Faarax sida ku cad war qadda Lr. 13490. ee Tr. 24,12,86. ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijeed Laanta Xis. Guud

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharcj Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

**WUXUU XEERIYEEY**

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Jeeg Wareega Lambar 0028090 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maalijeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh.So. 45.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Cabdi Faarax

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijeed Laanta Burco in ay siiso J/le Xasan Sheekh Nuur lacagta caddadee du tahay Sh.So. 45,000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28,12,86.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.**

Dr. Cabdi Salaad Shongole.

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

MGT/135/86

Tr. 20.12.86

UJ: Baafin Jeegagga Wareega oo Lumay oo kala ah:-

- 1) 0611685 ee Xanbaarsanaa Lacag dhan 100,000/= Sh.So.  
Tr. 22.11.86.
- 2) 0376658 ee Xanbaarsanaa Lacag dhan 50.000/= Sh.So  
Tr. 4.12.86.
- 3) 547698 ee Xanbaarsanaa Lacag dhan 14.500/= Sh.So.  
Tr. 22.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. TOGDHEER

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegagga Wareega ee Lumay ee kor ku xusan;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: od. 69-D-L. (9.9.65 Lumid Jeegagga War ga ee kala ah:-

1) 0611685, ee ku qornayd Lacag dhan 100.000/= Sh. So. ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco, Tr. 22.11.86;

2) 0376658 ee uu Xanbaarsanaa Lacag dhan 50.000/ Sh.So. lagana sameeyey Laanta Burco Tr. 4.12.86;

3) 547698 kuna qoran tahay Lacag dhan 14.500/ Sh. So. Tr. 22.11.86 lagana sameeyey Laanta Burco, dhammaan Jeegaggaasu waxay ku qoran yihiin oo ka lumeen, J-le Cabdi Axmed Sh. Muuse, oo Ganacsade ah.

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo Cusboonaysiiyo Jeegagaas Wareega ee kor ku xusan J-le Cabdi Axmed Sh. Muuse, markii ay ka soo wareegto muddo dhan 20 Casho, laguna Sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Gacantana laga geliyo Jaalaha iska lahaa ee aanu kor ku soo xusnay ee ay ka lumeen.

GUDDOOMIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO

(Dr. Abokor Islaw Cumar)

**MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA**  
**MGH/36/86**

**UJ:-** Digreeto Cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee Lumay Lambarradooduna kala yihiin:-

1) J.W. No. 0227976 ee 7.4.86; lacagtiisuna tahay 38.200.00, kuna qornaa Cabdullaahi Ismaacul Yuusuf.

2) J.W. No. 0262423 ee 12.7.86, lacagtiisuna tahay 40.0000/ kuna qornaa Xuseen Yuusuf Cabdullaahi.

3) J.W.No. 0262768 ee 17.7.86, lacagtiisuna tahay 47.000/ dhammaantoodna laga sameeyey Laanta laad ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Hargeysa.

Guddoomiyaha Max. Gobolka W/Galbeed Hargeysa

**MARKUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay Maxamed Cabdi Xasan ee 10.12.86 uuna ku Codsanaayey in loo Cusboonaysiiyo Jeegaggaasi Wareega ee Lumay ee kor ku xusan;

**MARKUU ARKAY:** Taarka uu Bangigu Laamihisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray ee 15.9.86.

**MARKU UARKAY:** Xaashida Lambarkeedu yahay 1070 ee 13.12.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo K. Soomaaliyeed L. laad ee Hargeysa kuna caddeeyeen in Jeegaggaasi Wareega ee lumay Lambarradooda, lacagtooda, taariikhdooda, cidda loo sameeyey iyo Laanta laga sameeyey kor ku xusan yihiin.

**MARKUU ARKAY:** In Jeegagaasi Wareega ee Lumay uu lacagtooda iska leeyahay Ninka la yiraa Maxamed Cabdi Xasan.

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

**WUXUU GO'AAMIYEY**

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee Lumay Lambarradoodu kala yihiin kuwa kor ku xusan, loona Cus-

boonaysiiyo Maxamed Cabdi Xasan Cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

### WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa, si ciddii haysataa Jeegaggaasi Wareega ee Lumay ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa  
(Ibraahim Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa  
(Axmed Wacays Maxamed)

**MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA**  
IRSI/MGH/20/86 Taariikhda 10.8.85

**UJEEEDO:** Digireeto Cusboonaysiin Jeegga Wareega ee Lumay Lambar yahay 159019 ee Lacagtiisu tahay 100.000/Shiillin ee Taariikhdiisu tahay 3.7.86 ee ku qoran Yuusuf Xaaji Cawaale, lagana sameeyey Laanta laad Hargeysa.

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed ee Hargey.**

**MARKUU ARKAY:** Arjiga ay soo qoratay Faadumo Ashkir Jaamac, ee ku taariikhaysan 8.8.86, ee ay ku codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

**MARKUU ARKAY:** Taarka Bangigu laamihiisa u wada qoray ee Taariikhdiisu tahay 6.8.86;

**MARKUU ARKAY:** Xaashida Lambarkeedu yahay 0782 ee Taariikhdeedu tahay 9.8.8 , kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeegga Wareega ee lumay lamb. yahay 159019 ee Lacagtiisuna tahay 100.000/Shiillin, ee Taariikhdiisu tahay 3.7.86, ee laga sameeyey Laanta laad Hargeysa loona sameeyey Yuusuf Xaaji Cawaale;

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 69.70 ee Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.82kii.

#### **WUXUU GO'AAMIYEEY**

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee Lambarkiisu yahay 159019, loona cusboonaysiiyo Faadumo Ashkir Jaamac, cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

#### **WAXAA LA FARAYAA**

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegga Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho hadii ay doonaan.

**GUDDOOMIYAHA M.G. W/GALBEED HAR.**  
(Ibraahin Faarax Maxamed)

**KAALIYAHA M.G.W/GALBEED HARGEYSA**  
(Axmed Wacays Maxamed)

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**GUDDOOMIYAHA MGB**

**MARKUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J.le Cumar Maxamed Cali;

**HADDUU TIXGELIYEEY:** In uu dhumay Jeeg War. Lr. 0370006, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J.le Aweys Cabdulqaadir Maxamed Raaxoole sida ku cad warqadda lam. 13765 ee Tr. 30.12.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis.Guud;

**HADDUU ARKA:** Qod. 69 Sharciga L. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

**WUXUU XEERIYEEY**

In baabi'yo (Ammortamento) Jeeg Wareeg Lr. 0370006 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J.le Aweys Cabdulqaadir Maxamed Raaxoole.

**WAAXAA LA AMRAYAA**

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe in ay siiso J.le Cumar Maxamed Cali lacagta cadadkee du tahay Sh.So. 100.000/ oo ah bedjelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maa Imood laga bijlaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii jinta ka horreysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 30.12.1986

**GUDDOOMIYAHA MGB**  
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)